Waraaqda Xaqiiqada Acaamilkeena

Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH) Agoosto 2007

Daawada aan waxba ka taraynin HIV iyo Tijaabada Noocyada Fayruska kala Duwan

WARAAQDA AQBAARTA MACAAMILKEENA

Waraaqdaan aqbaarta ku qoran hayso adiga iska leh waxeyna kaa caawineysaa su'aalahaaga ku saabsan daawada aan waxba ka tarin HIV iyo barnaamijka tijaabada noocyada fayruska kala duwan.

Waa maxay noocaaan fayruska ee HIV la midka ah?
Sida fayruska hargabka, waxaa jira noocyo kala duwan ee HIV. Noocyadan HIV xaraf aa lagu aqoonsada. Tusaale ahaan nooca ugu caansan Maraykanka waa nooca fayruska ee B.

Waa maxay daawo aan wax ka tarin HIV?
Mararka qaarkood marka uu qofka qaato daawo ama dawada culus ee uu dhaqtar ugu qoray HIV, HIV ayaa isu bedeli kara mid daawada ka adag oo waxba aysan ka tarin.daawoyinkaas. Haddey tanu dhacdo, daawada wax uma qabanayso sidii loogu talagalay inay u dawayso faysruska. Markaasi HIV waxey noqonasaa mid aysan daawada waxba ka tarin.

Sidee loo baaraa daawada aan waxba ka tarin HIV iyo nooca fayruska kala duwan ee HIV ku nooca ah?
Baaritaanada waxaa laga eega sambalka dhiiga ee aad u bixisay in lagu baaro inuu jirkaaga ku jiro difaaca HIV lidka jirka ku ah ee HIV ama baaritaanka guud aad ugu tagtay dhqtarka HIV. Sambalka dhiiga ah waxaa loo dirayaa MHD.

Qofkasta oo laga baaro cudurka HIV ma waxa haddana laga baaraya nooca HIV ee daawada aan waxba ka tarin?
Maya. Haddey tijaabada sheegayso inaad HIV qabtid waxaa xaq u yeelanaysa inaad baaritaan kale lagu marsiyo oo sheegayasa nooca fayruska ku nooc ah HIV oo markasi lagu kala ogaanayo inuu yahay mid ka hortaga nooc walba oo daawa. Baaritaankaan labaad waa lacag lacagla'aan. Waxaana laga eegaya isla sambalkii koobaad ee marka ugu horeysay laga baarayay HIV. Waxaad heleysaa inta aad barnaamijkaan ku jirto baaritaan lacagla'aan ah ee lagu baaro daawada aan waxba ka tarin HIV iyo noocyada fayryska la mid ah haddii:

- 12 bilood ee la soo dhaafay lagaa helay jeermiska cudurka HIV, iyo
- Aadan weli wax daawoyin ah u qaadan HIV

Miyuu qof waliba ku ogaan doonaa adiga iyo baaritaankaaga HIV ?
Sharciga Minnesota wuxuu macluumaadka ku saabsan baaritaanka HIV iyo xanaanada caafimaadkaaga ka dhigaya mid kuu qaas ah. Waxa adiga qaas ku ah iyo in arrimahaaga qarsoodi ah kuu asturnaadaan macnaheedu wuxuu yahay inaan cidna loo ogolayn in la siiyo aqbaarta caafimaadkaaga haddaanan adiga ama dhaqtarkaaga codsanin koobiyada natiijoyinka ka soo baxay baaritaanka. Codsiyada oo idil waxaa loo tixglinayaa kuwo asturnaan mudan. Ciddii jabiso sharciyada asturnaanta waxaa ku dhacaya ganaaxyo culus.

Sideen ku ogaanayaa inuu HIV yahay midaysan daawada waxba ka taraynin?
Dhaqaatiirtu waxey eegaan laba nooc ee baaritaanka dhiigga is ay ku ogaadaan daawada aan waxbka ka taraynin HIV. Baaritaanadaan waxaa lagu suubiyaa shaybaarro gaar ah. Dhaqaatiirta waxay u isticmaalaan natiijoyinka soo baxa si ay ugu caawiso inay soo saaraan daawada saxda ah ee la dirirta nooca HIV ee ku jira qofka dhiiggiisa.

Ma laga yaaba in qof loo gudbiyo nooca cudurka HIV ee daawada aan waxba ka tarin inta uusan qofkaasi qaadan wax daawada HIV?
Haa, haddii uu qofi qabo cudurka aan daawaada waxba ka taraynin ee HIV, isaga ama ayada waxay cudurkaa qabadsin kartaa qofkale. Haddi qofka aad ka qaaday cudurka ahaa qof qaba cudurka aan daawada waxba ka taraynin, cudurkaa aan waxba dawada ka taraynin ee HIV adiga ayaa lagu qaabadsiin karaa.

Maxaay muhiim u tahay baaritaanka daawada aan waxba ka tarayn cudurka HIV iyo noocyada fayruska kala duwan?
Natiijada ka soo baxda baritaankaas waxay dhaqtarkaaga fursad u siineysa inuu doorto nooca daawada ugu fiican ee lagu daweyo HIV. Madaama dadka badankood aysan qabin nooca HIV aanu

Waraaqda Xaqiiqada Acaamilkeena

Tjaabada Daawada aan Waxba ka Taraynin HIV: Waraaqda Aqbaarta Macaamilkeena – Baalka 2

daawada wax ka tarayn, marka ugu horeysa oo ay ka warhelaan inay qabaan cuduraka HIV, iyo baritaanka oo qaali ah, sidaa awgeedna dhaqaatiirta aad bay u yartahay inay baaritaankaas u dalbadaan bukaanka cusub ee qaba HIV.

Aqbaaraha laga helay tijaabada barnaamijkaan waxay MDH ka caawinaysaa inay wax ka bartaan waxa ay yihiin noocyada kala duwan HIV ee ku faafa Minnesota iyo daawaynta ugu fiican ee ku habboon dadka halkaan deggan. Marka la fahmo inta ay la egtahay cadadka daawada aan waxba ka taraynin HIV iyo nooca fayruska kala duwan ee laga helo jaaliyadda waxay ka caawin karaan in la horumuriyo kahortagga HIV iyo xanaanada caafimaadka ee Minnesota.

Side ku heli kartaa natiijada daawada aan waxba ka taraynin HIV iyo nooca fayruska HIV lamid ka ah?
Waxaa dooran kartaa bixiye caafimad inuu helo natiijada baaridda daawada aan waxba ka taraynin HIV iyo nooca kale ee la mid ah ayadoo loo sheego lataliyaha HIV marka lagu siiyo natiijada HIV ama adigoo dhaqtarkaaga weydiya inuu asagoo wakiil kaa ah in uu la xiriiro MDH. Natiijada daawada aan waxba ka tarayn waxaa kaliya oo warbixn ka dhiibi kara shaqaale caafimaad ee u tababaran aqoona u leh. Haddii aad rabto inaad heshid koobiga natiijada, waa inaad laf ahaantaada adigoo sita aqoonsi sawir leh aad iska xaadirisaa MDH.

Gormuu dhaqtarkaaga uu heli karaa natiijada jawaabta daawda aan waxba ka taraynin HIV iyo nooca fayruska lamidka ah?
Najiijada jawaabta waxaa loo diri karaa bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga qiyaastii 3 ilaa 4 todobaad kaddib marka MDH ay helaan sambalka dhiigga.

Haddii uu HIV adiga ku haya uu yahay mid aan daawada waxba ka taraynin taasu macnaheedu miyaa in aan lagu siin daawo kaa cawinta HIV?
Waxa jira dawoyin badan oo lagu daaweyo HIV. Mararka qaarkood daawada HIV sida laga rabay wax uguma qabato nooca HIV aan daawada waxba ka taraynin, laakin waxaa laga yaabaa in xooga nacfi ah laga helo. Haddii uu HIV aad qabtid uu yahay midaan daawda waxba ka tarin, dhaqtarkaaga ayaa natiijada u isticmaali karo si uu ugu helo dawoyin kale ee waxtar leh

Yaad kala xirii kartaa haddii aad su'aalo ka qabitd daawada aan waxba ka taraynin HIV iyo tijaabada noocyada fayriska ku nooca ah?
Waxaad hadda ama mar walba aad weydiin kartaa su'aal kasta oo ku saabsan tijaabada HIV oo kamid yihiin tibaabada daawada aan waxba taraynin. Lataliyahaaga tijaabada HIV ama bixiyahaaga xananaada caafimaadka aya ka jawaabi kara su'aalahaaga badankooda. Dhaqtarkaaga ama bixiyahaaga xanaanada caafimaadkaga aya ah qofka ugu fiican ee jawaab ka dhiiba su'aalahaaga ku saabsan daawaynta HIV.

Waxaad kaloo MDH aad kala xiriiri kartaa:

- In aad ogaatid sida aad u heli lahayd natiijada daawada aan waxba ka taraynin HIV iyo tijaabada noocayada lamidka ah.
- Weydii su'aalaha ku saabsan barnaamijka.

Natiijada tijaabada laguma bixinayo telefoonka. Fadlan fiiri liiska lagala xiriiro ee hoos ku xusan.

Haddaad u baahato aqbaar dheerad ah ee ku aadan Waaxda Caafimaadka Minnesota (MHD) ee Caafimadka daawada aan waxba ka tarin HIV iyo barnaamijka tijaabada noocyada lamidka ah, fadlan naga booqo shabakada internetka: http://www.health.state.mn.us/divs/idepc/diseases/hiv/hivstatistics.html

Haddaad rabtid inaad waxa ku saabsan barnaamijkaan aad kala hadashid qof ka socda Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH), fadlan soo wac 651-201-5414 (ama telefonka lacag la'anta 1-877-676-5414 haddaad maagaalada dibaddeda ka soo wacaysid)

Haddii lagaa helay jermiska cudurka HIV aadna su'aalo ka qabtid xaaladdaada caafimaadka ama adeegyada bulshada ee kuu furan oo aad heli kartid, fadlan la soo xiriir:
Minnesota AIDS Project AIDSLine
Magaalada: (612) 373-AIDS ama (612) 373-2465 TTY
Lacag La'aan: 1-800-248-AIDS ama 1-888-820-2437 TTY
http://www.mnaidsproject.org

MINNESOTA MDH DEPARTMENT OF HEALTH

HIV Surveillance Program
P.O. Box 64975
St. Paul MN 55164-0975
651-201-5414, 800-657-3970
http://www.health.state.mn.us/divs/idepc/diseases/hiv/index.html